

UW Medicine

Tilmaamaha Foomka Arjiga Kaalmada Dhaqaale

Kani waa arjiga kaalmada dhaqaale (sidoo kalena loo yaqaan daryeelka samofalka) ee UW Medicine. Gobolka Washington waxa uu khasab kaga dhigay dhammaan isbitaalada inay bukaanka iyo qoyskooda siiyaan kaalmo dhaqaale kuwaas oo buuxiya shuruudo dakhli oo looga baahan yahay. Waxaad ugu qalmi kartaa Kaalmada Dhaqaale ee ku salaysan qoyskaaga inta uu le'eg yahay iyo dakhligaaga, xataa haddii aad leedahay caymis caafimaad. Kaalmada waxa abaalmarin loo bixiyaa haddii aad buuxiso shuruudaha Kaalmada Dhaqaale kuwaas oo ay kamid yihiin dakhliga qoyskaaga oo 300% ama kayar Heerka Saboolnimda Fadaraalka. Waxaad codsan kartaa xog dheeraad ah ama waxaad tixraaci kartaa boggayaga Kaalmada Dhaqaale ee uwmedicine.org/financialassistance ama valleymed.org/financialassistance.

Maxay kaalmada dhaqaale bixisaa? Kaalmada dhaqaale ee isbitaalku waxay bixisaa adeegyada aasaasiga ee isbitaalka ee ay bixisay UW Medicine taas oo ku xidhan u-qalmiddaada. Kaalmada dhaqaale waxaa dhici karta inayna wada debbarin kharashka daryeelka caafimaadka, taas oo ay kamid tahay adeegyada ay ururo kale bixiyeen.

Si arjigaaga looga hawlgalo waa inaad :

- Xog naga siisaa qoyskaaga; Ku buuxi tirada xubnaha qoyskaaga guriga kula deggan (qoyska waxaa kamid ah dadka aad dhiiga wadaagtaan, guur isku kiin keenay, ama la korinayo ee aad wada deggan tihiin)
- Xog naga sii dakhliga qoyskaaga bishii (dakhliga kahor intaad cashuur ama wax kale laga jarin)
- Dokumentiyo caddaymo ah oo muujinaya dakhliga iyo hantida qoyska noo keen
- Ku lifaaq wixii xog ah ee dheeraad ah haddii loo baahdo, tusaale ahaan, warqad caddaynta ah oo aad ku xoojinayso xogtaada
- Saxeex oo taariikhda ku qor foomka

Arjiga Kaalmada Dhaqaalaha oo Ingiriisi ah iyo waraaqaha taageerada, waxa aad iminka isticmaali kartaa MyChart (marka laga reebo Airlift Northwest) ee gudbinta waraaqaha kuwaas oo ku salaysan goobta daryeelkaaga. Arjiyada kale waxaa lagusii gudbin karaa bosta, faakiska, ama iyada oo la keenayo. UW Medicine waxa ay u qaban doontaa sir iyo si sharaf leh. Wixii macluumaad ah ee loo gudbiyo kaalmada dhaqaale waxaa la ilaalin doonaa macluumaadkiisa sirta ah sida uu dhigayo Daaqada Caymiska Caafimaadka iyo Sharciga La Xisaabtanka (Health Insurance Portability and Accountability Act, HIPAA).

Nidaamka arjigaaga, waa inaad nogotaa bukaan duwaan gashan oo leh Lambarka Duwaanka Caafimaadka

(Medical Record Number, MRN): Wixii ah Harborview Medical Center, UW Medical Center-Montlake, UW Medical Center-Northwest, UW Physicians iyo UW Neighborhood Clinics kala hadal Xarunta La Hadalka 206.520.5000 si aad marka hore iskugu duwaan geliso.

| | | |
|---|---|---|
| <p>Harborview Medical Center UW Physicians UW Neighborhood Clinics Financial Counseling 325 9th Ave; Mail Stop 359758 Seattle, WA 98104-2499 Taleefan 206.744.3084 FAAKIS 206.744.5187 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 4:30 galabnimo. mychart.uwmedicine.org</p> | <p>UW Medical Center-Montlake UW Physicians UW Neighborhood Clinics Financial Counseling 1959 NE Pacific Street; Mail Stop 356142 Seattle, WA 98195-6142 Taleefan 206.744.3084 FAAKIS 206.598.1122 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 4:30 galabnimo. mychart.uwmedicine.org</p> | <p>UW Medical Center-Northwest UW Physicians UW Neighborhood Clinics Financial Counseling 1550 N 115th St Seattle, WA 98133-9733 Taleefan 206.744.3084 FAAKIS 206.598.1122 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 4:30 galabnimo. mychart.uwmedicine.org</p> |
| <p>Valley Medical Center Patient Financial Services P.O. Box 59148 Renton, WA 98058-2148 Taleefan 425.690.3578 FAAKIS 425.690.9578 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 5:00 galabnimo mychart.valleymed.org/#mychart</p> | <p>Valley Medical Center Patient Financial Services 3600 Lind Ave SW, Suite 110 Renton, WA 98057-4970 Taleefan 425.690.3578 FAAKIS 425.690.9578 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 5:00 galabnimo. mychart.valleymed.org/#mychart</p> | <p>Airlift Northwest Patient Financial Services 6505 Perimeter Road S., Ste 200 Seattle, WA 98108 Taleefan 206.598.2912 FAAKIS 206.521.1612 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 5:00 galabnimo.</p> |

Haddii aad wax su'aal ah qabto sidoo kalena aad u baahan tahay in lagaa kaalmeeyo buuxinta arjigan fadlan la xidhiidh xarunta kor ku qoran. Waxaad kaalmo ku heli kartaa sababo kala duwan, oo ay kamid yihiin naafonimada iyo kaalmada luuqadda. Waxaanu kula socodsiiin doonaa natiijada u-qalmidda iyo xaqa aad rafcaan kaga qaadan karto, haddii ay ku munaasab tahay, muddo 14 maalmood ah gudahood markaad soo xaraysay arjiga kaalmada dhaqaalaha, oo ay kujiraan dokumentiyada dakhliga. Gudbinta arjiga kaalmada dhaqaalaha, waxaad noo oggolaatay inaanu samayno wixii baadhitaan ah ee aanu ku xaqiijinayno waajibaadka dhaqaale iyo xogtaada.

Waxaanu doonaynaa inaan ku caawino. Fadlan arjigaaga si dhakhso ah u soo gudbi! Waxaa dhici kartaa in biilka laguu soo diro ilaa aanu xogtaada helayno.

UW Medicine

Foomka Arjiga Kaalmada Dhaqaale – qarsoodi ah

Fadlan dhammaan xogta wada buuxi. Haddii ayna ku munaasab ahayn, ku qor “NA.” Ku lifaaq bogag dheeraad ah haddii aad u baahato.

BAADHITAANKA XOGTA

Ma waxaad u baahan tahay turjumaan? Haa Maya Haddii ay haa tahay, qor luuqadda aad doorbidayso:

Bukaanku muu dalbaday Medicaid? Haa Maya Waxa dhici kartaa in looga baahdo inuu marka hore dalbado intaanu eegin kaalmada

Miyuu bukaanku leeyahay caymiska caafimaadka? Haa Maya

Bukaanku muu qaataa adeegyada dadwaynaha ee sida TANF, Raashinka Aasaasiga ah, ama WIC? Haa Maya

Bukaanku ma bilaa guri baa? Haa Maya

Daryeelka caafimaad ee bukaanku ma waxa uu la xidhiidhaa shil baabuur ama dhaawac shaqada ka soo gaadhay? Haa Maya

FADLAN FIIRO GAAR AH

- Kuuma dammaanad qaadi karno inaad u-qalmayso kaalmada dhaqaale, xataa haddii aad dalbato.
- Markaad soo dirto arjigaaga, waxaanu eegi doonaa dhammaan xogta waxaananu kaa dalban karnaa xog dheeraad ah ama caddayn dakhliga ah.
- 14 maalmood gudahood kadib marka uu na soo gaadho arjigaaga dhammayska tiran iyo dokumentiyadu, ayaanu kula soo socodsiiin doonaa haddii aad

XOGTA BUKAANKA IYO QOFKA DALBANAYA

| Magaca Hore ee Bukaanka | Magaca Aabaha Bukaanka | Macaga Awowga Bukaanka |
|--|-------------------------------------|--|
| <input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Dheddig <input type="checkbox"/> Wax kale (oo sheegaya _____) | Lambarka Diwaanka Caafimaadka (MRN) | Taariikhda Dhalashada Bukaanka |
| Cidda Bixinta Kharashka ka Masuulka ah (Dammiinka) | Xidhiidhka Bukaanka uu la Leeyahay | Dhalashada Dammiinka Taariikhda |
| Cinwaanka Waraaqaha lagu soo Diro | | Lambarka Xidhiidhka ee Guud () _____ () _____ Cinwaanka limeylka: _____ |
| Magaalada | Gobolka | Sib Koodhka |

Xaaladda Shaqaalenimo ee Qofka Masuulka ka ah Bixinta Kharashka:

- Shaqeeya (Taariikhda shaqada uu bilaabay: _____) Ma shaqeeyo (muddo intee le'eg: _____)
- Iskii u Shaqaysta Arday Naafo ah Hawlgab ah Wax kale (_____)

XOGTA QOYSKA

Liiska xubnaha qoyska ee guriga deggan, oo ay kamid yihiin adiga. “Qoys” waxaa kamid ah dad aad isku dhiig tihiin, guur isku kii keenay, ama la koriyay oo aad wada deggan tihiin kuwaas oo kugu tiirsanaa markii ugu danbeeyay ee aad cashuurta dakhliga ee fadaraalka shubtay.

XAJMIGA QOYSKA _____ Ku lifaaq bog dheeraad ah Haddii aad u baahato

| Magaca | Taariikhda Dhalashada | Xidhiidhka Bukaanka uu la Leeyahay | Haddii aad tahay 18 jir ama kawayn: Magaca cidda loo shaqeeyo ama isha dhaqaalaha | Haddii aad tahay 18 jir ama kawayn tahay: Isugaynta dakhliga bishii (kahor intaan cashuurta laga jarin): | Sidoo kale dalbanaya kaalmo dhaqaale? |
|--------|-----------------------|------------------------------------|---|--|---------------------------------------|
| | | | | | Haa / Maya |
| | | | | | Haa / Maya |
| | | | | | Haa / Maya |
| | | | | | Haa / Maya |

Dhammaan dadka waawayn ee qoyska dakhligooda waa in la sheegaa. Ilaha dakhliga waxa kamid ah, tusaale ahaan:

- Mushaharrada - Lacagta bilaa-camalka la siiyo - Iskaa u shaqaysiga - Magdhawga shaqaalaha - Lacagta naadada la siiyo - SSI - Taakulada ilmaha/xaaska
 - Barnaamijyada tabobarka shaqada (arday) - Lacagta hawlgabka - Xisaabta hawlgalba - Waxkale (sharrax ka bixi fadlan _____)

Foomka Arjiga Kaalmada Dhaqaale – qarsoodi ah

MACLUUMAADKA DAKHLIGA

XASUUSNAW: Waa inaad raacisaa arjigaaga caddaynta dakhliga.

Waa inaad bixisaa xogta dakhliga qoyskaaga. Xaqiijinta dakhliga waxa looga baahan yahay si loo ogaado u-qalanka kaalmada dhaqaale. **Dhammaan xubnaha qoyska ee 18 jir ah ama kawayni waa inay shaaciyaan dakhligooda. Haddii aanad waraaqo caddayn ah keeni karin, waxaad soo gudbin kartaa warqad aad soo qortay oo aad saxeexday oo aad ku sharraxayso dakhligaaga. Fadlan caddayn soo raaci il kasta oo dakhli oo aad sheegtay.**

Tusaalayaasha caddaynta dakhliga waxaa kamid ah:

- Bayaanka cashuur jarista “W-2”; ama
- Waraaqaha mushaharka ee wakhtigan (3 bilood); ama
- Bayaanka Bangiga (3 bilood); ama
- Cashuur bixintii sanadkii hore, oo ay la socoto jadwalladu haddii ay ku munaasab tahay; ama
- Qoraal, bayaanada cidda loo shaqeeyo oo saxeexan ama cid kale (warqad caddayn ah) oo lagu sheegayo xaaladdaada dhaqaale ee wakhtigan haddii aanad hayn caddayn dakhli; ama
- Foomamka ansixinaya ama diidaya u-qalanka Medicaid iyo/ama kaalmada caafimaadka gobolku bixiyo; ama
- Foomam ansixinaya ama diidaya magdhawga shaqo la’aanta; ama bayaan qoraal ah oo cidda loo shaqeeyo ama hay’adaha caydha ka socota.

Haddii aanad hayn caddayn dakhliga ama dakhligaba aanu kusoo galin, fadlan kusoo lifaaq bog dheeraad ah oo aad ku sharraxayso.

XOGTA KHARASHKA

(Fadlan ku lifaaq bog kale si aad ugu taxdo daymaha kale, haddii

Waxaanu xogtan u isticmaalaynaa si aanu sawir buuxa uga helno xaaladdaada dhaqaale.

Kharashka Qoyska Bishii:

| | | | |
|---------------------------|---|----------------------------|----------|
| Kirada/Daynta Guriga | \$ _____ | Kharashka Caafimaadka | \$ _____ |
| Kharashka Caymiska | \$ _____ | Laydhka, biyaha iyo gaasta | \$ _____ |
| Daymaha/Kharashaadka Kale | \$ _____ (biilka carruurta, daymaha, daawooyin, wax kale) | | |

MACLUUMAADKA HANTIDA

Baaqiga Wakhtigan ee Xisaabta

\$ _____

Baaqiga Xisaabta Kaydka

\$ _____

Qoyskaagu hantiyahan kale ma haystaan?

Fadlan calaamadi dhammaan kuwa ku munaasabka ah

Saamiyada Curaaro (Bonds) 401K Xisaabta Kayga Caafimaadka Masuul hanti

Hantida (oo uu ku jiro guriga la deggan yahay) Ganacsi gaar ah

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Fadlan ku lifaaq bog dheeraad ah haddii ay jirto xog dheeraad ah oo ku saabsan xaaladahaaga dhaqaale ee aad kujirto oo aad doonayso inaad nala wadaagto, sida dhaqaale xumo, dakhli xilliyeed ama kumeel gaadh ah, ama khasaare shakhsi ahaaneed.

HESHIISKA BUKAANKA

Waan fahansanahay in UW Medicine ay xaqiijin karto xogta iyaga oo dib u eegid ku samaynaysa xogta daynta sidoo kalena ka doonayna xog ilo kale si ay uga caawiso inay ogaadaan inaan u qalmo kaalmada dhaqaale ama qorshayaasha lacag-bixineed.

Waxaan caddaynayaa in xogta sare ay tahay dhab oo ay sax tahay ilaa inta aan ogsoonahay. Waan fahansanahay haddii xogta aan bixiyaa ay been noqoto, natiijada inay noqonayso in la ii diido kaalmada dhaqaale, oo aniga masuuliyaddeed qaadayo oo bixinayo kharashkii adeegga la i siiyay.

Saxeexa Qofka Dalbanaya

Taariikhda